

Soo sheegista Xanuunka ka jira Goobta cuntada

LAYNKA TOOSKA AH EE XANUUNKA CUNTADA KA DHASHA EE MINNESOTA EE 1 - 877 - FOOD ILL

Waajibaadka PIC

Qofka masuuliyada leh (PIC) waa inuu ka saaraa dhammaan shaqaalaha xanuunsan goobta cuntada haday:

- Shubmayaan
- Matagayaan

Shaqaalaha qaba shubanka ama matagu kuma laaban karaan shaqada ugu yaraan 24 saacadood kadib marka xanuunku ka ba'o.

Qor dhammaan warbixinada shaqaalaha ee shubanka iyo mataga adoo ku daraaya taariikhda ay ku biloowdeen kuna qoraaya [Diiwaanka Xanuunka Shaqaalaha \(PDF\) \(Employee Illness Log\)](#).

PIC waa qasab inuu u sheego waaxdaada caafimaadka maxaliga ah ama MDH shaqaalaha laga helo wax kamid ah xanuunadaan:

- Norovirus
- *Salmonella*
- *Shigella*
- Fayraska cagaarshoowga A
- Sunta Shiga oo soo saaraysa *E. coli*
- Caabuq ka dhashay bakteeriya kale, fayras ama jeermis jirka gala

Shaqo ka saarida iyo xadidaada ayaa qaban kara haddii shaqaale laga helo wax kamid ah xanuunnada kor ku qoran.

Waajibaadka shaqaalaha

Xanuunnada qaar waxaa la iskaga gudbin karaa cuntada ayagoo ka yimaada shaqaalaha kuna faafa macaamiisha. Sidaas awgeed, shaqaaluhu ma shaqayn karaan haddii ay:

- Shubmayaan
- Matagayaan

Shaqaalaha qaba shubanka ama matagu kuma laaban karaan shaqada ugu yaraan 24 saacadood kadib marka xanuunku ka ba'o.

Shaqaaluhu waa inay u sheegaan PIC haddii ay qabaan wax kamid ah astaamaha soo socda:

- Shuban
- Matag
- Indha caseeye (maqaarka oo jaalle noqda ama indhaha oo cadaada)
- Dhuun xanuun qandho wata
- Dhaawac furan, oo caabuq qaba

Shaqaaluhu waa inay u sheegaan PIC haddii ay qabaan wax kamid ah caabuqyada soo socda:

- Norovirus
- *Salmonella*
- *Shigella*
- Fayraska cagaarshoowga A
- Sunta Shiga oo soo saaraysa *E. coli*
- Caabuq ka dhashay bakteeriya kale oo jirka gasha, fayras ama jeermis jirka gala

Shaqaalaha ay qasab ku tahay inuu usoo sheego PIC haddii uu cuno, ama ka shakiyo isha cudur dilaacay 30 maalmood ee lasoo dhaafay.

Soo sheeg cabashooyinka xanuunka ee macaamiisha

PIC waxa alaga doonayaa inuu u sheego waaxda caafimaadka ee deegaankaaga ama MDH cabashooyinka ka yimaada macaamiisha:

- Soo sheega inay la jiradeen shuban ama matag kadib markay cunto ka cuneen goobta.

AMA

- Soo sheega inuu qabo ama iskaga shakiyay inuu qabo caabuqyada norovirus, fayraska cagaarshoowga A, *Salmonella*, *Shigella*, sunta Shiga oo soo saaraysa *E. coli*, ama bakteeriya kale oo caloosha ah, fayras ama fayras curiye jirka gala kadib markay cunto ka cuneen maqaayada.

Cabashooyinka macaamiisha waxaa sidoo kale toos loogu sheegi karaa Laynka tooska ah ee bilaashka lagu waco ee Xanuunka cuntada ka dhasha ee MDH oo ah 1-877-366-3455 ama waxaa la buuxin karaa foomka oonleenka ah ee [Warbixinta Minnesota ee Cudurka ka dhasha cuntada iyo Biyaha \(Minnesota Foodborne & Waterborne Illness Report\)](#).

Macluumaadka

[Employee Illness Log \(PDF\)](#)

www.health.state.mn.us/people/foodsafety/dwi/empillog.pdf

[Minnesota Foodborne & Waterborne Illness Report](#)
www.health.state.mn.us/foodill

[Use of Earned Sick and Safe Time - Minnesota Statutes 181.9447, subd. 11](#)
<https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/181.9447>



Hennepin County Environmental Health

479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344

612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth

Illness reporting_Somali_HC_6-25

Content courtesy of the [Minnesota Department of Health](#)

